

# Ka-badbaadaayaasha Duufaanta Ohio: Ka war haay FEMA

---

Release Date: Juun 6, 2024

**COLUMBUS** - Dadka degan Ohio oo codsaday gargaar federaal waxey u baahnaan karaan iney daba-galaan FEMA ayna bixiyaan macluumaad iyo dukumintiyo dheeri ah si codsigooda horey loogu sii wado. Kuwa wali caawinaad uga baahan soo-kabasho kadib duufaanadii 14 Maars oo aan wali codsan, waxey wali haystaan wakhti ay sidaa ku sameeyaan.

## Codsadayaasha leh Caymis

Haddii aad la codsatay FEMA aadna leedahay caymis, waxaad u baahnaan doontaa inaad u gudbisid dejinta caymiska ama warqada inkiraada FEMA. Sharciyan, FEMA ma laba jibaari karto faa'iidooyinka ama qasaaraha ay daboolaan ilo kale.

Haddii dejinta caymiskaaga la soo daahiyey, la hadal marka hore wakiilkaaga caymiska. Wuxaad dabadeed Waaxda Caymiska Ohio kala xiriiri kartaa 800-6860-1526 haddii aadan awodin inaad xalisid cabashadaada. FEMA iyo Maamulka Ganacsi Yar ee Mareykanka (SBA) waxey sidookale dad ka caawini karaan lacag-bixinada xiliga hore. Wax badan ka baro aidgoo kala xiriiraya Leenka-Caawinta FEMA 800-621-3362 ama ka wacaya SBA 800-659-2955.

## Codsadayaasha racfaan ka qaadanaya Go'aan Hore ee FEMA

Si taxaddir leh u akhri warqadaada FEMA: waxey bixin doontaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan waxa la gudbiyo haddii aad doorbidid inaad racfaan ka geysid go'aanka FEMA. Wuxaad haysataa 60 maalmood laga bilaabo taariikhda warqadaada si aad sidaa u sameysid.

Wuxaad ugu gudbin kartaa dukumintiyada FEMA qaabab badan.

- **Onleen ahaan:** Adeegso koontadaada onleenka ee FEMA. Si aad u degsato koonto onleen ee FEMA ah, booqo DisasterAssistance.gov, ku dhufo "Codso



FEMA

Page 1 of 2

Onleen" oo raac jihoyinka.

- **Boosto ahaan:** Xarunta Ka-shaqeynta Qaranka ee FEMA, P.O. Box 10055, Hyattsville, MD 20782-7055
- **Fakis ahaan:** 800-827-8112, Fiiro-gaar ah: FEMA
- **Waji-ka-waji:** Booqo wax Xarun Kasoo-kabasho Musiibo ah. Xarun ka hel halkan: [fema.gov/DRC](http://fema.gov/DRC).

Maanka ku haay in qad toos ah ee caawin sharchiyeed uu sidookale u diyaarsanyahay dadka Ohio ay saameysey duufaanadii 14 Maarso. Badbaadayaasha kaalmo ugu baahanaya arrimo shari la xiriira - ay ku jiraan kuwa ku xiran faa'lidooyinka FEMA iyo SBA - waxey wici karaan (888) 534-1432 xili kasta una reebi karaan fariin haddii ay soo wacayaan saacadaha shaqada kadib.

### **Xasuusin: Taariikhda kama dambeysta Codsiga waa Luulyo 1, 2024**

Kuwaan wali codsan oo u baahan caawin soo-kabasho, bilaw meel-marinta codsiga adigoo aadaya onleenka [DisasterAssistance.gov](http://DisasterAssistance.gov), lasoo dagaya [abbka moobeelka FEMA](http://abbka.moobeelka.FEMA) ama ka wacaya FEMA Qadka-Caawinta ee 800-621-3362-3362. Haddii aad isticmaashid adeega isku-duwida muuqaal, adeeg taleefon ee qoraal leh ama waxkale, usii FEMA taleefonkaaga adeegaas.

Xusuusnow: Xitaa haddii aad caymis ku jirtid, FEMA waxey kaa caawin kartaa kharashka aynan daboolin shirkadaada caymiska. Nooc walba ee gargaar, FEMA waxey eegi doontaa lacag-bixinta caymiskaaga waxeyna barbardhigi doontaa khasaarahada ama waxyeeladada la xaqiijiyey.

Codsadayaasha waxey wali awoodaan iney gudibiyaan dukumintiyada ay codsatay FEMA, sida warqada dejinta caymiska, kadib marka taariikhda kama dambeysta ee diiwaangelinta dhaaftey.

**Xaqiji inaad codsatid kahor taariikhda kama dambeysta ee Luulyo 1.** Xog dheeraad ah ee ku saabsan hawsha kasoo-kabasho musiibo ee Ohio, booqo [www.fema.gov/disaster/4777](http://www.fema.gov/disaster/4777).



**FEMA**

Page 2 of 2